

Somali

WARQADA ILAALINTA

KA DIFAACIDA
GUDNIINKA FIRCOONIGA

Waa inaad had iyo jeer wadataa warqaddan markii aad u safraysid dibada. Markaa waxaad si cad ugu sheegi kartaa qoyskaaga in gudniinka fircooniga (FGM) ay dambi ka tahay Jarmalka.



WAX SU'AALO AH MA QABTAA?

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan gudniinka fircooniga, waxaad taleefan ama khadka tooska ah kala xiriiri kartaa taleefanka caawinta qaranka ee wixii la xiriira rabshadaha ka dhanka ah haweenka. Telefoonka caawimaadda wuxuu bixiyaa talo oo 17 luqadood ah - 24 saacadood maalintiiba.



Dokumentigaan ku dar dukumiintiyadaada safarka oo ku xafid meel aamin ah si aad had iyo jeer u haysatid markii aad u safraysid dibada.

Waxaa daabacay

Magaalada Hansiyaatikada ee Hamburg
Waaxda Shaqaalaha, Arrimaha Bulshada, Qoyska iyo Isdhaxgalka Waaxda Xiriirka Dadweynaha ee Hamburg,
47, 22083 Hamburg

Cinwaanka boostada:
Behörde für Arbeit, Soziales, Familie und Integration
Zentraler Broschürenversand
Tel. 040/428 63 - 7778
Imeeyl: publikationen@basfi.hamburg.de

WAA MAXAY GUDNIINKA FIRCOONIGA (FGM)?

Gudniinka Fircooniga ah FGM waa gudniinka qaar ama gebi ahaanba xubinta taranka dumarka oo loo sameynaayo sababo aan la xiriirin caafimaad. Waxay xadgudub ku tahay xuquuqda aadanaha.

GUDNIINKA FIRCOONIGA AH WUXUU WAXYEE-LO XAD DHAAF AH U LEEYAHAY CAAFIMAADKA

FGM wuxuu badanaa sababi karaa dhibaatooyin caafimaad oo cimri dheer. Dhaqankan dartiis, gabdhaha ayaa dhiig bax u dhiman ama u dhiman karaan infekshan. Dumar badan ayaa ka cawdo xanuun wakhti dheer iyo cabasho dhanka jirka iyo maskaxda ah oo joogto ah. Sida:

Kaadida iyo galmada oo xanuun badan, kaadida oo aan la cishan karin, dhibaatooyinka caadada ee daran iyo sidoo kale Caabuqyada kaadiheysta iyo minka.

Dhibaatooyinka kale ayaa noqon kara:

Ma-dhalaysnimo, dhibaatooyinka dhalada ama murugo daran.

GUDNIINKA FIRCOONIGA WUXUU JABIYAA SHARCIYADA JARMALKA IYO KUWA CAALIMAGA AH

FGM ayaa ciqaab la isku mariyaa Jarmalka. Qof kasta oo gudniinka fircooniga sameeya ama iskudaya inuu gooyo kaliifka xubinta taranka dumarka waxaa lagu ciqaabaya xabsi ilaa 15 sano ah. Sharciga xitaa wuxuu ku qabanayaa haddii dambigu uu ka dhacay dibadda.

Waalidka gabadha kaas oo, guriga ama dibedda jooga, ee ku qasba ilmahooda inay ku sameeyaan gudniinka fircooniga ah ama ku qalqaaliya qof kale inuu sidaan sameeyo, ayaa sidoo kale la ciqaabi karaa.

Gudniinka Fircooniga ee la sameeyey ama la isku dayay waxay sababi kartaa in hay'adaha dawlada si ku meel gaadh ah ama si joogto ah uga saaraan gabadha qoyska waxayna sababi kartaa waalidku inay waayaan awooda haysashada gabadhooda.

Marka loo imaado ciqaabta, waalidiinta aan heysan dhalashada Jarmalka waxay kaloo waayi karaan xuquuqdooda ah inay si kumeel gaar ah ama si joogto ah ugu noolaadaan Jarmalka.

Gabdhuhu waa in laga dugiyaa oo laga ilaaliyaa wixii waxyeelo ah ama dhaawac ku imaanaya sharaftooda jir ahaaneed. Waa mas'uuliyadda dowladda inay hubiso in la ciqaabo xadgudubyada lagu sameeyo carruurta iyo xuquuqda haweenka.

Senator-ka Shaqaalaha, Arimaha Bulshada, Qoyska iyo Isdhaxgalka

Senator-ka Caafimaadka iyo Ilaalinta Macaamiisha

Senator-ka caddaaladda

Senator-ka Arimaha Gudaha iyo Isboortiska